Dugsiga hoose ee Sanislo
Nidaamka Ka Qaybgalka Waalidka iyo Habsocodyada
Sanadka 2020-2021

Dugsiga hoose ee Sanislo ayaa mahadnaqaya oo dhiiro gelinaya ka qayb qaadashada waalidka ee dugsiga iyo guriga. Waxaan sido kale fahamsanahay muhiimada abuuritaanka wada shaqayn adag oo lala yeesho bulshada. Xidhiidhyadan waxa u suura galinayaan shaqalaha dugsiga Sanislo, qoysaska iyo bulshada in ay ka wada shaqeeyaan kor u qaadida guul ka gaadhista arday kasta oo dhigta Sanislo.

Dugsiga hoose ee Sanislo wuxuu aqoonsan yahay in gargaarka lagu bixiyay barnaamijka Darajada 1-aad uu kordhinaayo awoodeena kor uqaadista khibradaha waxbarasho ee ardayda, iyo in la abuuro iskaashi xooggan oo qoys iyo bulsho. Sanislo dugsiga hoose wuxuu ka shaqeenayaa inuu ku daro qoysaska barnaamijka Drajada I-aad.

NIDAAMKA DAWEYNTA WAALIDKA ISKUULKA

Dugsiga hoose ee Sanislo, oo lala kaashado qoysaska, wuxuu kobciyaa oo dib u eegaa nidaamka ka qaybgalka waalidka ee dugsiga /waalidka sanad kasta. Dukumeentigaan waxaa sidoo kale laga heli karaa bulshada degaanka ee Spanish, Vietnaam, Iyo Somaali. Intaa waxaa dheer, waalidiinta iyo bulshada waxay heli karaan dukumeentiga dib u eegista kulanka ugu horeeya ee PTA, iyo Habeenkeena dhaqameedka ah ee sanad walba.

Qoysaska Sanislo waxaa lagu marti qaadi donaa kulan sandle ah, wakhti ku haboon, halka lagu ogeysiiyo haddi ay Sanislo kaqeybgaleyso Drajada I-aad. Waxaa lagu falanqeynayaa qorshaha Sanislo ee Qorshaha I-aad ee lana socodsiiyay kaalintooda sida lammaanayaasha ku lug leh waxbarashada ilmahooda. Sannad dugsiyeedka, kulankaas waxaa loo qorsheeyay 11/30/2020 6pm.

Sanislo waxay martigalisaa dhowr xafladood oo qoys ah oo diiradda lagu saarayo guul gaadhka waxbarasho. Waxaa intaa dheer, kalkaaliyayaasha laba-luqadlaha ah waxay la xiriiraan waalidiinta kooxaha luuqadaha kala duwan waqtiyo kala duwan si waalidiinta aan luuqada ingiirisiga ku hadlin ay bixin karaan talooyin sido kale weydiyaan su'aalo ku saabsan barnaamijka Sanislo ee waxbarashada. Hagid gaar ahaan loogu tala galay ardayda fasalka xanaanada caruurta iyo qoysaskooda waxaa la qabtaa ka hor intaan dugisga la bilaabin sannad kasta. Wacyigelinta loogu tala galay ardayda cusub ee fasallada 1-aad ilaa 5-aad ayaa la qabtaa fiidkii ka hor intaan dugsiga l abilaabin. Sanislo waxay ku dhiiro gelisaa oo taageertaa xubnaha qoysska ee tabaruca waqtiga fasallada iyo mashaaricda dugsiga. Bisha Nufeembar (November), Sanislo waxa kale oo ay qabataa shirarka waalidka/Macalinka shaqsi ahaaneed. Shirku wqxa la qabtaa fiidkii iyo maalinta sabtida si uu u caawiyo jadwalka qoysaska. Turjubaanada waxaa lagu maalgeliyaa Drajada I-aad.

Sanislo ururka iskaashiga waalidka/Macalinka (PTA) waxay waxay qabataa 3 kulan iyo ka badan sanadkiiba. Daryeelksa ilmaha ayaa la heli karaa waalidiinta jecel in ay caruurtooda keenaan kulanaandaan. Xubnaha ururkaan waxay ka soo qaybgalaan shirarka Kooxda Hogaaminta ee dhismaha marka ajandaha ay ku lug leeyihiin Iskaashiga Waalidka/Shaqqalaha. Sanislo waxay haysaa ugu yaraan saddex habeen oo ah Habeenka Qoysaska. Habeen manhaj ah ayaa sannadle ah STEM waxay bixisaa fursadaha qoysaska si ay uga qayb galaan waxqabadyo la xiriira Sayniska, Teknolojiyada, Injineernimada iyo Teknoolojiyada. Qoysaska habeenki aqrista/qorida waxa ay ku lug leeyihin siyaabo lagu taageero akhrista iyo qorista gurtiga. Farshaxanka waxaa loo dabaaldegaa sanadka oo dhan iyadoo loo marayo Art walks iyo riwaayadaha miyuusigta.

Sanislo ayaa si joogta ah u wargalinaysa waalidiinta ku saabsan qiimeynta waxbarasho. Kulamada Waalidiinta/Macalimminta ee Nufeembar November, qiimeynta iyo shaqada ardayga ayaa dib loo eegayaa waalid kasta. Warbixinta Horumarka Ardayga waxaa loo diraa guriga saddex jeer sannadkaan. Waxqabadka ardayga ee Tallaabooyinka Heerka Waxbarashada (Imtixaanka MAP kombiyuutarka), iyo Qiimeynta Kulliyadda Gobolka (SBA) ayaa loo diraa qoysaska.

Macallimiinta iyo maamulaha Sanislo waxaa laga heli karaa telefoon, email, iyo shaqsi ahaan waalidiinta marka ay codsadaan. Shirka waalidka/macallinka bisha Nufeembar November, macalimiintu waxay raacaan iskoolka/waalidka, iyo waalidka, ardayda iyo macalinka oo idil waxa ay saxiixaan dukumeentigaan. Waalidiintu waxay sidoo kale ka qayb qaataan shirarka Kooxda Waxqabadka Ardayda (SIT) si ay uga caawiyaan qorsheynta faragelinta ardayda aan weli la kulmin heerarka waxqabadka.

Nidaamka ka qaybgalka Walidka ee Dugsiga waxaa loo heli karaa dib-u-eegista waalidka kasta ee xafiiska dugiga. Waxaa sido kale loo diraaa waalidka. Dib u eegista qorshaha wuxuu ka dhacaa kulannada ururka iskaashiga waalidka/macalinaka (PTA).

FULINTA

Siyaasada/Nidaanmka ka qaybgalka Waalidka ee Sanislo ayaa la sameeyay / dib loo eegay, oo ku heshiiyay, waalidiinta carruurta ah ee ka qayb galaya barnaamijka Drajada I-aad sida lagu caddeeyay daqiiqadaha kulamada.

Siyaasadda ka Qaybgalka Waalidka/Nidaamyada waxaa dib loo eegayaa 11/24/2020, waxaana la hirgelin doonaa sanad dugsiyeedka. Dugsigu wuxuu u qaybin doonaa Nidaam ka qaybgalka Waalidka/Nidaamyada dhammaan waalidiinta ee ka kaqaybgalaaya Darajada I-aad ee ka qayb qaata oo ka dhigaya in ay u helaan bulshada dhexdeeda ama ka hor 11/10/2020.

_____ _____

Madaxa Dugsiga **Taariikhda**

_____ _____

Wakiilka/Waalidka ee PTA **Taariikhda**